



## Fariin ka socota Xoghayaha

Waan ku faraxsanahay in aan idin la wadaago qorshaha Sannad Miisaaniyadeedka 2012 ee Waaxda Nabad-Ilaalinta Dalka Mareykanka (Department of Homeland Security, DHS) iyo u fidinteeda marin-u-helka waxtarka leh ee barnaamijyada iyo hawlaha nabad-ilaalinta dalka ee la siiyo dadka aqoonta Ingiriisigu ku xaddidan yahay. Markay tahay DHS, waxaan aqoonsannahay muhiimadda ay leedahay kartida lagula xiriiro si wax ku ool leh dhammaan shaqooyinkayga iyo hawlahayaga, ee aan kaliya ahayn kuwa ku hadla Ingiriisiga.

Markii lagu jiray Sannad Miisaaniyeedkii 2011, DHS ayaa dadaal dhammaan Waaxda oo idil ka jiray ugu kacday sidii loo qiimayn lahaa baahidayada xaadirkan ee loo qabo luqadda, iyo adeegyada luqadda ee hadda jira. Waxa ka mid ah tusaalooyinka badan ee adeegyada haatan jira ee adeegyada luqadda ah ee ay Waaxdu bixiso, laguna faahfaahiyay qorshahan meesha ku lifaaqan, ayaa ah shuruudda gaarka ah ee Kastammada iyo Ilaalinta Xuduudka Mareykanka (U.S. Customs and Border Protection, CBP) in dhammaan wakiilladda xuduudda ilahaaliya, iyo saraakiisha CBP ee ka shaqeeya xuduudka Koonfur-galbeed, inay ugu hadlaan luqadda Isbaanishka si waxtar leh. Sidoo kale, Muwaaddanimada Maraykanka iyo Adeegyada Waaxda Socdaalka (U.S. Citizenship and Immigration Services) ayaa ku bixisa macluumaad ku saabsan Socdaalka iyo Muwaaddanimada luqaddo badan, Maamulka Amniga Gaadiidkuna wuxuu hayaa calaamado lagu heli karo siddeed luqadood. Intaa waxa u dheer, Hay'adda Maareynta Xaaladaha Deg-degga ah ayaa bixisa waxyaabo badan oo ku qoran luqado badan oo la siiyo dadka aafda ka badbaada, waxayna leedahay baro internet oo aan afka-Ingriiska ku qornayn, iyo tareennada Gargaarka Afaada shaqaalhooda sidii ay u ogaan lahaayeen oo wax uga qaban lahaayeen baahida luqadda meelaha wax ka dhacaan. Kuwan iyo iyo tusaalooyin farbadan ayaa muujinaya u heellanaanta waaxdu ay u leedahay sidii loo hubin lahaa marin-u-helka habboon ee luqadda dhammaan marka la eego shaqooyinkeeda iyo hawlaha.

Hase yeeshe, waxa jira tallaabooyin dheeraad ah oo DHS ay ka qaadi karto sidii ay u horumarin lahayd wada xiriirka shaqsiyaadka leh aqoonta Ingiriisiga xaddidan. Qorshaha Marin-u-Helka Luqadda ee DHS, oo ay ugu wargaliyeen waayo-aragnimada iyo khibradaha shaqaalaha ka shaqeeya dhammaan Waaxada oo idil iyo waliba fikradaha ka yimid kuwa dibaadda ah ee arrimaha daneeya ee wakiil ka ah beelaha kala duwan dhammaan Qaranka, ayaabixiya qaab-dhismeedka sidii loo sii wanaajin lahaa marin-u-helkooda shaqsiyaada aqoonta Ingiriisiga xaddidan leh si ay u helaan adeegyada iyo waxqabayada DHS.

Qorshaha Marin-u-Helka Luqadda ayaa sheegaya:

**Waa ujeeddada DHS inay siiso marin-u-hel wax ku ool leh shaqsiyaada aqoonta Ingiriisiga xaddidan ku leh hawlaha, adeegyada iyo waxqabadyada, iyo barnaamijka taageera hadaf mawduuc kasta oo Nabad-Ilaalinta Dalaka iyada oo ku bixisa caawimo luqadeed tayo leh wakhtiga habboon. Sidaas darted Qaybaha DHS waa inay ku daraan xeeladahooda caadiga ah iyo qorsheyntooda meherad tixgalimaha marin-u-helka luqadda, oo ay tilmaamaan oo ku tarjumaan dukumentiyada muhiimka ah luqadaha badiyaa lala kulmo, ku bixiyana adeegyada turjumaadda meelaha ay ku habboon tahay, oo ay shaqaalaha ku tacliimiyaan**

**arrimaha ku saabsan mas'uuliyadaha marin-u-helka luqadda iyo sida loo isticmaalo ilaha marin-u-helka luqadda ee la heli karo.**

Illaa sannadka soo socda, waa inay Qayb kasta oo DHS (haddii hawlgal ama taageero yihiinba) ee xiriirka la leh dadweynaha ayaa looga baahn yahay inay dhammaystiraan qorshaheeda marin-u-hel ee luqadeed si loo hirgaliyo ujeeddadaas,

Ra'yi ka bixinta arrinta ayaa annaga muhiim noo ah. Fadlan u soo dir wixii ra'yi ama su'aalaha ah ee ka caawin kara wargalin ahaan qorshayaasha Qaybaha DHS ee haatan lagu gudo jiro Xafiiska Xuquuqda Madaniga iyo Xoriyadaha Madaniga (Office for Civil Rights and Civil Liberties, CRCL) emailka [crcloutreach@dhs.gov](mailto:crcloutreach@dhs.gov), ama booqo [www.dhs.gov/crcl](http://www.dhs.gov/crcl) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Janet Napolitano  
Xoghayaha Nabad-Ilaalinta Dalka